| | |
|---|---|
| 29. Oo labada Dhudhun isku marmaan (sakaraad Dartiis). | وَٱلْتَفَّتِ ٱلسَّاقُ بِٱلسَّاقِ ﴿٢٩﴾ |
| 30. Eebahaa Xaggiisaa la aadi. | إِلَىٰ رَبِّكَ يَوْمَئِذٍ ٱلْمَسَاقُ ﴿٣٠﴾ |
| 31. Mase Rumaynin Gaalku Xaqa mana tukannin. | فَلَا صَدَّقَ وَلَا صَلَّىٰ ﴿٣١﴾ |
| 32. Laakiin wuu Beeniyay wuuna Jeedsaday. | وَلَٰكِن كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ﴿٣٢﴾ |
| 33. Wuxuuna aaday Ehelkiisii isagoo kibirsan. | ثُمَّ ذَهَبَ إِلَىٰٓ أَهْلِهِۦ يَتَمَطَّىٰٓ ﴿٣٣﴾ |
| 34. Halaag Buuse Mutaa. | أَوْلَىٰ لَكَ فَأَوْلَىٰ ﴿٣٤﴾ |
| 35. Haddana Halaagbuu Mutaa. | ثُمَّ أَوْلَىٰ لَكَ فَأَوْلَىٰٓ ﴿٣٥﴾ |
| 36. Ma wuxuu u maleeyay Dadku in looga tagi Bilaash (Dan la‘aan). | أَيَحْسَبُ ٱلْإِنسَٰنُ أَن يُتْرَكَ سُدًى ﴿٣٦﴾ |
| 37. Miyuusan ahayn Dhibic mani ah oo la Dhibciyo. | أَلَمْ يَكُ نُطْفَةً مِّن مَّنِىٍّ يُمْنَىٰ ﴿٣٧﴾ |
| 38. Markaas Noqota xinjir oo Eebe Abuuro Ekeeyana. | ثُمَّ كَانَ عَلَقَةً فَخَلَقَ فَسَوَّىٰ ﴿٣٨﴾ |
| 39. Kana yeelo Labadii Nooc lab iyo Dhaddig. | فَجَعَلَ مِنْهُ ٱلزَّوْجَيْنِ ٱلذَّكَرَ وَٱلْأُنثَىٰٓ ﴿٣٩﴾ |
| 40. Eebaha Saas kara miyuusan Awoodin inuu soo Nooleeyo wixii Dhintay. | أَلَيْسَ ذَٰلِكَ بِقَٰدِرٍ عَلَىٰٓ أَن يُحْـِۧىَ ٱلْمَوْتَىٰ ﴿٤٠﴾ |

Geeridu waa xaq, waase arrin daran, wuxuuna Eebe innooga warramay Sakaraadka iyo dhibaatadiisa, iyo inaan qaraabo iyo cidna wax u tari karayn Eeba xaggiisana loo ahaan, taasoy waajibtahay in loo darbado, mase habboona in la maro waddadii Abii-jahal iyo wixii la mid ahaa, een xaqa rumaynin cibaadana falin, balse beeniyay kana jeedsaday kibir iyo islawaynina ehelkiisa ugu dhexnoolaa’halaagbuuse mutaa. miyuusanse Dadku ogayn in waajib laga rabo iyo xaqoo la raaco’iyagoo xusuusan waxa Eebe ka abuuray iyo siduu u ekeeyay Rag iyo Haweenna ka dhigay, taasoo ku tusin awoodda Eebe iyo inuu soo kulmin wixii dhintay si uu u abaal mariyo dhammaantood. Al-Qiyaamah (26-40).

## Suurat Al-Insaan سورة الإنسان

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Dhab ahaan waxaa dadka soo maray waqti wax la sheego uusan ahayn (uusan jirin).

هَلْ أَتَىٰ عَلَى ٱلْإِنسَٰنِ حِينٌ مِّنَ ٱلدَّهْرِ لَمْ يَكُن شَيْـًٔا مَّذْكُورًا ﴿١﴾

2. Annagaa ka abuurray dadka dhibic isku Dheehan, Imtixaan Dartiis, waxaana ka yeellay wax maqle wax arka ah.

إِنَّا خَلَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ مِن نُّطْفَةٍ أَمْشَاجٍ نَّبْتَلِيهِ فَجَعَلْنَٰهُ سَمِيعًۢا بَصِيرًا ﴿٢﴾

3. Annagaa Dadka tusinnay Jidka, waxayna Noqdeen mid Shukriya (mahadiya) iyo mid Gaalnimo Badan.

إِنَّا هَدَيْنَٰهُ ٱلسَّبِيلَ إِمَّا شَاكِرًا وَإِمَّا كَفُورًا ﴿٣﴾

4. Annagaa u darabnay Gaalada silsilado iyo katinado iyo naarta Saciira.

إِنَّآ أَعْتَدْنَا لِلْكَٰفِرِينَ سَلَٰسِلَا۟ وَأَغْلَٰلًا وَسَعِيرًا ﴿٤﴾

5. kuwa Baarriyiinta ah waxay ka cabbi weel Buuxa oo lagu Dheehay kaafuur.

إِنَّ ٱلْأَبْرَارَ يَشْرَبُونَ مِن كَأْسٍ كَانَ مِزَاجُهَا كَافُورًا ﴿٥﴾

6. Waa il ay ka Cabbaan Addoomada Eebe, ayna ujiidaan say Doonaan,

عَيْنًا يَشْرَبُ بِهَا عِبَادُ ٱللَّهِ يُفَجِّرُونَهَا تَفْجِيرًا ﴿٦﴾

7. Wayna oofiyaan Nadarka, waxayna ka yaabi maalin sharkeedu fidi (qiyaamada).

يُوفُونَ بِٱلنَّذْرِ وَيَخَافُونَ يَوْمًا كَانَ شَرُّهُۥ مُسْتَطِيرًا ﴿٧﴾

8. Waxayna Quudiyaan iyagoo jecel miskiinka Agoonka iyo kan xabbisan (Dhibban).

وَيُطْعِمُونَ ٱلطَّعَامَ عَلَىٰ حُبِّهِۦ مِسْكِينًا وَيَتِيمًا وَأَسِيرًا ﴿٨﴾

9. Iyagoo Dhihi waxaan idiin quudinnay dar Eebe, mana idinka doonaynno Abaalmarin iyo Mahadnaq Midna.

إِنَّمَا نُطْعِمُكُمْ لِوَجْهِ ٱللَّهِ لَا نُرِيدُ مِنكُمْ جَزَآءً وَلَا شُكُورًا ﴿٩﴾

Eebaa jiray isagoon wax kale joogin, isagaana hadhi markii la tago, waxaana dadka soomaray waqti ayna waxba ahayn, Eebaase abuuray si loo imtixaano kooda fiican iyo kan kale, jidka iyo wanaaggana wuu u caddeeyay, gaaladana caddibaadbaa u sugnaatay, Mu'miniinta Eebba adeecda ee ballankiisa oofisa, Qiyaamadana ka yaabta, masaakiinta, agoonta iyo dadka dhibbanna quudiya dar Eebe dartiis wuxuu u darbay Janno iyo wanaag. Qataada wuxuu yidhi sharku wuu fidi maalintaas Wallaahiye intuu cirka iyo dhulka ka gaadho. Al-Insaan (1-9).

---

10. Waxaan ka Yaabaynaa Eebahanno Maalin (wajigu) doorsoomi oo Daran.

إِنَّا نَخَافُ مِن رَّبِّنَا يَوْمًا عَبُوسًا قَمْطَرِيرًا ﴿١٠﴾

11. Eebana waa ka Dhawray sharka Maalintaas, wuxuuna siiyay nuur iyo Farax.

فَوَقَىٰهُمُ ٱللَّهُ شَرَّ ذَٰلِكَ ٱلْيَوْمِ وَلَقَّىٰهُمْ نَضْرَةً وَسُرُورًا ﴿١١﴾

12. Wuxuuna ku abaal Mariyay Samirkooda Dartiis janno iyo Xariir.

وَجَزَىٰهُم بِمَا صَبَرُوا۟ جَنَّةً وَحَرِيرًا ﴿١٢﴾

13. Waxayna ku Dangiigsan Sariiro Sare, iyagoon ku arkayn qorrax iyo Dhaxan midna.

مُّتَّكِـِٔينَ فِيهَا عَلَى ٱلْأَرَآئِكِ ۖ لَا يَرَوْنَ فِيهَا شَمْسًا
وَلَا زَمْهَرِيرًا ﴿١٣﴾

14. Waxaana u dhaw hooska jannada, waxaana loo soo Raariciyay Midheheeda.

وَدَانِيَةً عَلَيْهِمْ ظِلَـٰلُهَا وَذُلِّلَتْ قُطُوفُهَا تَذْلِيلًا ﴿١٤﴾

15. Waxaa lala kor socon weelal Fidla ah iyo Koobab Quruurado ah.

وَيُطَافُ عَلَيْهِم بِـَٔانِيَةٍ مِّن فِضَّةٍ وَأَكْوَابٍ كَانَتْ قَوَارِيرَا۠ ﴿١٥﴾

16. Quruuradahaas oo fidla ah si fiicanna u Qiyaasan.

قَوَارِيرَا۟ مِن فِضَّةٍ قَدَّرُوهَا تَقْدِيرًا ﴿١٦﴾

17. Waxaana laga Waraabiyaa Ehlu jannaha Sharaab macaan oo lugu Dheehay sinjibiil.

وَيُسْقَوْنَ فِيهَا كَأْسًا كَانَ مِزَاجُهَا زَنجَبِيلًا ﴿١٧﴾

18. Waana il lugu Magacaabo Salsabiil (ay ka cabbi).

عَيْنًا فِيهَا تُسَمَّىٰ سَلْسَبِيلًا ﴿١٨﴾

19. Waxaana u adeegi wiilal waari, Haddaad Aragtana aad u malayn Jawhar la saydhay.

۞ وَيَطُوفُ عَلَيْهِمْ وِلْدَٰنٌ مُّخَلَّدُونَ إِذَا رَأَيْتَهُمْ حَسِبْتَهُمْ
لُؤْلُؤًا مَّنثُورًا ﴿١٩﴾

Eebe ciddii ka yaabta wuxuu ku abaal marin sharkoos ka dhawro iyo janno uu siiyo, iyagoon wax xun la kulmayn ay una shaqayn adeegayaal waari oo wiilal wanaagsan u shaqayn, iyagoo loo dhammeeyay nicmooyinka Eebe aayadaha ku tilmaamay oy waajib tahay ruuxii caqli leh inuu higsado una darbado. Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: Adduunyada waxa lagu sheegahayo iyo jannada waxaa kulmiya magaca. Al-Insaan (10-19).

---

20. Haddaad Aragto halkaas waxaad arki nicmo iyo sharaf wayn.

وَإِذَا رَأَيْتَ ثَمَّ رَأَيْتَ نَعِيمًا وَمُلْكًا كَبِيرًا ﴿٢٠﴾

21. Dharkooduna (Ehlu Jannaha) waa xariir Jilicsan oo cagaaran iyo Xariir adagba, waxaana loo xidhi fidlo Gacmaha la Gashado, Eebana wuxuu ka waraabiyaa sharaab nadiifah.

عَـٰلِيَهُمْ ثِيَابُ سُندُسٍ خُضْرٌ وَإِسْتَبْرَقٌ ۖ وَحُلُّوٓا۟ أَسَاوِرَ
مِن فِضَّةٍ وَسَقَىٰهُمْ رَبُّهُمْ شَرَابًا طَهُورًا ﴿٢١﴾

22. Kaasi waa Abaalmarintiinii Falkiiniina wuxuu Noqday mid la Mahadiyay.

إِنَّ هَـٰذَا كَانَ لَكُمْ جَزَآءً وَكَانَ سَعْيُكُم مَّشْكُورًا ﴿٢٢﴾

23. Annagaa Quraanka Nabiyow kugu soo Dajinnay.

إِنَّا نَحۡنُ نَزَّلۡنَا عَلَيۡكَ ٱلۡقُرۡءَانَ تَنزِيلٗا ٢٣

24. Ee ku Samir Xukunka Eebe, hana Maqlin Dambiile iyo Gaalnima Badane (warkiis).

فَٱصۡبِرۡ لِحُكۡمِ رَبِّكَ وَلَا تُطِعۡ مِنۡهُمۡ ءَاثِمًا أَوۡ كَفُورٗا ٢٤

25. Xus magaca Eebe subax iyo Galabba.

وَٱذۡكُرِ ٱسۡمَ رَبِّكَ بُكۡرَةٗ وَأَصِيلٗا ٢٥

26. Habeenkana Eebe u sujuud, una tasbiixso Habeenkii (u tuko) waqti Dheer.

وَمِنَ ٱلَّيۡلِ فَٱسۡجُدۡ لَهُۥ وَسَبِّحۡهُ لَيۡلٗا طَوِيلًا ٢٦

27. Kuwaasi waxay Jecelyihiin tan soo Dagdagaysa (Adduunyada) waxay kaga Tagayaan Gadaashoodana Maalin Culus (Qiaamada).

إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ يُحِبُّونَ ٱلۡعَاجِلَةَ وَيَذَرُونَ وَرَآءَهُمۡ
يَوۡمٗا ثَقِيلٗا ٢٧

28. Annagaa Abuurray Dadka, Adkaynayna xubnohooda, Haddaan Doonnana waxaan ku Baddalaynaa kuwa la mid ah.

نَّحۡنُ خَلَقۡنَٰهُمۡ وَشَدَدۡنَآ أَسۡرَهُمۡۖ وَإِذَا شِئۡنَا
بَدَّلۡنَآ أَمۡثَٰلَهُمۡ تَبۡدِيلًا ٢٨

29. Suuraddani waa waano, Ee Ruuxii Doona ha ka yeesho Eebe Xaggiisa waddo.

إِنَّ هَٰذِهِۦ تَذۡكِرَةٞۖ فَمَن شَآءَ ٱتَّخَذَ إِلَىٰ رَبِّهِۦ
سَبِيلٗا ٢٩

30. Waxna ma dooni kartaan in Eebe doona mooyee, Eebana waa wax walba oge falsan.

وَمَا تَشَآءُونَ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ
عَلِيمًا حَكِيمٗا ٣٠

31. Wuxuu galiyaa naxariistiisa ruuxuu doono, daalimiintana wuxuu u darbay cadaab daran.

يُدۡخِلُ مَن يَشَآءُ فِي رَحۡمَتِهِۦۚ وَٱلظَّٰلِمِينَ أَعَدَّ لَهُمۡ
عَذَابًا أَلِيمَۢا ٣١

**Jannada waxaa ku sugan waxaan ilu arag isagoo kale dhagna maqal qalbina ku soo dhici karin, waase in Eebaha Quraanka soo dajiyay la adeeco, dhibkana loo adkaysto, xumaanle warkiisana aan la maqal, adduunyana aan aakhara laga doorannin, si aan Naxariista Eebe u hello. Al-Insaan (20-31).**

## Suurat Al-Mursalaat سُورَةُ المُرۡسَلَاتِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaan ku dhaartay Dabaysha wanaaga lala Diro.

وَٱلۡمُرۡسَلَٰتِ عُرۡفٗا ١